



Munaasabad loogu dabaaldegayo dhismaha laga dhisay Faubion kaasi oo ah mid aan hore loo arag noociisa.

Dhismahan cusub ee dhawaan loo dhisay Iskuulka Faubion PK-8 wuxuu ku dhexyaalaa Jaamacada Concordia taasi oo ah iskaashi inagu cusub oo dhexmaray labo hay'adood oo mid tahay mid dadweynuhu leeyahay , iyada oo ta kalena ay tahay mid si gaar ah loo leeyahay. The newly-built campus that Faubion PK-8 School shares with Concordia University is a first-of-its-kind collaboration between public and private entities. Waxaa la qabanayaa kulan loogu dabaaldegayo kaasi oo lagaga wada hadlayo sida uu dhismahani u yahay mid aan hore loo arag iyo sidii ay bulshadu ugu midowday meel marintiisa dabaaldegaasi oo loo bixiyey” Naqsashada Todobaadka ee fasalka 3aad ilaa Shahaadadda PhD”, waxaa laga soo jeedin doonaa hadalo ku saabsan munaasabada iyo waxa kale oo kuu dheer in lagu daawadsiin doono dhismaha oo ku yaala Waqooyi-Bari Portland maalinta Tallaadada, ee bishan Abriil tahay 17ka.

Waxaa munaasabada ka hadli doona Maamulaha Dugsiga Faubion Jen McCalley iyo Naqshadeeye dhismaha Christopher Linn , iyada oo munaasabadaasi socon doonto inta u dhaxaysa 4:30 galabnimo ilaa 6:00 habeenimo. Waxa kale oo munaasabada ku soo qeybgali doono iyaguna qaar ka mid ah macalimiinta Jaamacada iyo kuwii sameeyey manhajka.

[Dhismahani cusub ee Faubion oo la furay sanad-dugsiyaadkani](#) ka dib markii ay ku baxday lacag dhan \$33,000 malyuun oo doolar oo qayb ka ahayd maalgalintii horumarinta iskuulada Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo maalgalin dheeraad oo ay bixisay Jaamacada Concordia oo wax lagaga qabanayey dhulka iyo agabka iskuulka. Cinwaanka iskuulka oo ku yaala 2930NE Dekum St. waxa weeyaan dhismihii ugu horeeyey ee noociisa ah ee laga dhiso iskuulada Portland labaatankii sanadood ee ugu dambeeyey kaasii oo ka kooban Jaamacada Waxbarashada ee Concordia, xarunta waxbarashada ee waqtiga hore, Xarunta Jimicsiga ee Kaiser Permanente, Goob ay ardaydu ku bartaan/tijaabiyaan xirfadaha sayniska iyo injineerka(STEM), iyo naadiga cuntada.

“Iskuulkani oo ah kii ugu horeeyey ee noociisa ah wadanka oo dhan”, ayaa laga hirgaliyey fasalka 3aad ilaa PhD laguna fuliyey iskaashi cusub oo dadweynaha – si gaara sidii u abuurii lahaa nabagelyo, caafimaad leh, bulsho badan oo aqoonta loo kordhiyo, halkaasi oo da’ yartu ay higsan karnaa riyadooda ugu sareysa inay gaaraan ee ah inay qaataan shahaada (PhD), waa sida ay leedahay shabakada munaasabada.

Qof kasta oo raba inuu ka qeybgalo munaasabadan bilaa lacagta ah waa in uu iska diiwaangaliyaa halkan [Shabakada Naqshada Todobaadka Portland](#).

Si aad u daawato sawiro dheeraad ah oo ah dhismaha Faubion halkan ka fiiri [fiidiyow ku saabsan markii la furayey iskuulka bishii Sebtembar](#).